
9.12.2020 Farriin ku saabsan warbixinta korona oo ka socota kooxda iskuduwidda arrimaha korona, taasoo loogu talaggalay dadka luqadaha ajnabiga ah ku hadla ee Helsinki, Vantaa iyo Espoo.

# Akhyaarta sharafta leh

Xaaladda korona ee Finland iyo gaar ahaan Caassimadda iyo hareeraheeda ayaa si dhkahso leh u soo xumaatay. Sidaa darteed waxaan ku dhiiriggalinaynaa dhammaan ururrada diiniga ah inay ilaaliyaan badqabka xubnahooda iyo bulshada inteeda kaleba.


**Waxaan idinka codsanaynaa inaad sameysaan waxyaabaha soo socda:**



1. Waa in la isticmaalaa afshareerka mar kasta oo dad lala kulmaayo (15 sano iyo wixii ka weyn), waana in xil la iska saaro kala fogaanshaha iyo nadaafaddaba.



2. Waa in la joojiyo qabanqaabada munaasabadaha ay dadku isugu imaanayaan. Haddii laga fursan waayo kulankana, waa in aanay dadka isu imaanaya ka badnaan 10 qof.



3. Bulshada idinku xiran waa in aad u gudbisaan macluumaadka la xariira hagista iyo tilmaanbixinta arrimaha korona, isla markaana aad ku caawisaan sidii ay ku aadi lahaayeen baaritaanka korona.



4. Fiiro gaar ah waa in loo yeesho hagista iyo tilmaanbixinaha la xariira karantiilka koronaha, aadna xasuusisaan bulshada idinku xiran inay raacaan hagista iyo tilmaanbixinta la siiyey. Mar haddii qofka la karantiilo, waa in uu joojoyo dhammaan dhaqdhaqaaqyada ka baxsan guriga. Waxa kaliya oo loo oggol yahay waa in uu bannaanka lugobaxsi u aado, isagoo iska ilaalinaaya in uu la kulmo dadka kale. Marka aad lugobaxsiga bannaanka u aadaysana dadka kale ee wadada maraaya ka fogoow masaafo dhan 2 mitir.



5. Waa inaad xasuusisaan in qofka xanuusan uusan aadi karin dukaanka ama goobaha adeegayada bulshadda, sidoo kale kama qaybgelikaro kulamada iyo xafladaha intaba. Haddii xitaa qofku uu isku arko astaamo fudud ama khafiif ah, waa in uu aadaa baaritaanka feyruska.



6. Waa inaad xasuusisaan xubnaha idinku xiran in waqtiga fasaxa lagu jiro aan tiro dad badan oo koox ahaan ah lagu kulmi karin. Sidaa awgeed xafladaha waaweyn ee qoyska ama shirar kale lama qaban karo xilligaan haatan ah. Sidoo kale xaddidaadaha la soo rogay waxaa ay khuseeyaan howlaha isboortiga, hiwaayadaha, dukaamaysiga, iwm.

## AAN ILAALINO NAFTEENA IYO TAN DADKA KALEBA!

Wixii faahfaahin ah kala xiriir said.aden@espoo.fi, sari.hammar@espoo.fi